

# Bulshada ODDS Kalfadhiyada Dhagaysiga

Agoosto 20-21, 2024

The Frosty Badger  
505 NW 1st St,  
Ontario, OR 97,914

Kullamadani waxaa loogu talagalay dadka deggan degmooyinka Harney, Lake iyo Malheur.

Kooxda hoganka ee Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS) ayaa kugu martiqaadaya inaad nala kulanto oo aad nala wadaagto mahadhooyinkaaga. Wuxaan qaban doonaa kullamo socon doona laba maalmood oo fool-ka-fool ah marka la gaaro Agoosto 20-keeda iyo 21-deeda kuwaasoo si fogaan-arag ah ama si fool-ka-fool ah looga qaybgeli karo goobta Frosty Badger. Fadlan ogow in Ontario wakhtigeedu ku beegan yahay Wakhtiga Maalinta ee Buurta (MDT, Mountain Daylight Time).

## Ajandaha Kalfadhiyada Dhagaysiga



### Talaadada, Agoosto 20

10 subaxnimo ilaa duhurkii MDT (9 ilaa 11 subaxnimo PDT) hay'adaha maaraynta kiisaska oo keliya

6 ilaa 8 fiidnimo MDT (5 ilaa 7 fiidnimo) dhammaan xubanaha ka mid ka ah bulshada qabta Naafanimada Garaadka iyo Korritaanka (I/DD)



### Arbacada, Agoosto 21

Duhurkii ilaa 2 galabnimo MDT (11 subaxnimo to 1 duhurnimo) dhammaan xubanaha ka mid ka ah bulshada qabta Naafanimada Garaadka iyo Korritaanka (I/DD)

Ikhtiyaaro kala duwan ayaa la heli karaa xilliyada lagu jiro kulan kasta.

Isticmaal gujoraacan ama iskaan garee koodhka QR ee hoose si aad ugu biirto midkood kullamada ka socda Zoom-ka.

Nala wadag  
ra'yi-celintaada!

## **Ma u baahan tahay taageerooyin dheeraad ah si aad uga qaybgasho?**

Waxaanu bixinaa caawimaad bilaash ah si cid kasta ay u isticmaasho adeegyadeena.

Tusaalooyinka qaarkood ee caawimaadan bilaashka ah waxaa ka mid ah:

- Luqadda dhigoolaha iyo turjubaanka luqadda lagu hadlo
- Qoraalo ku qoran luuqado kale
- Farta indhoolaha ama daabacaad waweyn
- Maqal iyo qaabab kale



Haddii aad caawimaad dhanka tarjumaadda ah aad u baahan tahay ama aad su'aalo qabto, fadlan la xiriir **ODDS.Questions@odhsoha.oregon.gov** ama wac 503-945-5811. Wuxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalka ku adag yahay.

## **Sidee loogu biiri karaa kulanka Fogaan-aragga ah?**

Isticmaal [gujoraacan](#) ama iskaan garee QR koodhka sare si aad u gasho mid ka mid ah kullamada kor ku xusan ee adiga ku khuseeya ama mid u furan dadweynaha oo dhan.

